


Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta Soo-jeedinayaa

Ciise iyo Laasaros



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Janie Forest
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org


©2025 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyaaso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Maryan iyo Maarta wey welweleen.
Walaakood Laasaros ayaa buqay.
Gabdhihii walaalalaha
ahaa waxay ogaadeen in
Laasaros lagayaabe inuu
dhakhso u geeriyoodo.
Dabadeen ciise ayay
farriin u dirsadeen.
Wuun ajecclaa
qoyskan yar

ee ka yimid
reer Beytaniya.

Markii Ciise maqlay waxyaalihii ku saabsanaa Laasaros xertiisii wuxuu u sheegay, "Bukaankanu ma aha kii dhimashada." Inkastoo Ciise fogaan maylo badan u jiray meeshaas, Isagu wuu ogaa sida ay tahay iyo waxa meeshaa ka jira oo ku dhacay Laasaros.



3

Ciise laba cisho ayaa la sugayay intuusan tagin Beytaniya. Deedna xertiisii waxuu ku yidhi wax ay ku wareereen inay fahmaan. "Laasaros waa dhintay. Aniga waan ku farxsanahay aawadiin inaan halkaas joogin si aad u rumeysataa." Maxay yihiin hadalada qalafsan micnahooda?

Maxayse tahay qorshaha Ciise



damacsan yahay inuu sameeyo?

4

Markii uu yimid Ciise Beytaniya, Laasaros afar cisho buu mootanaa.

Maydkiisi, karfan baaa lagu duuduubay oo iilka qabriga ayaa la dhigayba.



5

Maarta waxay u tagtay Ciise. "Walaalkaa waa la soo sara kicin doonaa" ayuu Ciise ku yidhi. "Waan garanayaa in maalinta ugu dambaysa la isa soo sarakicin doono," Maarta ayaa sidaa ugu jawaabtay.



6

Waxay ku fikirtay in ilaa iyo yoomal aakhiri maalinta ugu dambaysa dunda ay arki doonto Laasaros mar kale. Laakiin Ciise wuxuu ugala jeeday micno wax ka duwan micnahaas.




7

"Anigu waxaan ahay sarakicdda iyo nolosha,"

Ciise ayaa sidaa ku yidhi Maarta. "Kii i rumeystaa, in kastoo uu dhinto, wuu noolaan doonaa." Maarta wey rumeysnayd Ciise.

Weyna ogayd Isagu inuu yahay Wiilka Ilaah.

Laakiin siday bay ku dhici kartaa inuu caawiyo Laasaros?




8

Cidwalba way murugeysneayd sababta oo ah geeridda Laasaroos. Walaashii Maryan wey ooyneysay, haddaba saaxiibadeeda la joogay ayaa isku dayayeyinay qalbi qaboojiyaan iyada. Ciise na wuu la ooyay isna.



9

Ciise wuxuu aaaday qabuurtii isaga iyo dadkii kaleba. Dhagac weyn baa saarnaa qabriga meesha laga galo.



10


"Dhagaxa ka qaada," ayuu Ciise amar ku bixiyey. "Sayidow," bay Maarta ugu jawaabtay, "Hadda wuu urayaa, afar maalmood buu mootanaa."



11


Sdii uu ahaa amarkii Ciise ayay raggii uga qaadeen dhagaxii saarnaa. Dabadeedna Ciise wuxuu baryay Aabihiisii samada ku jiray. Ciise waxay u ahayd bandhigaasi mucjisada ahaa wax

weyn oo ay dadkii ku garan karaan in Ilaah soo diray Isaga.




12

"Laasaros!" ayuu Ciise ku dhawaaqay. "Soo bax!" Dadkii godka joogay wey la amakaageen. Ma Ciisaa nin dhintay nooleysiiyey?



13

HAA! Laasaros godkii buu ka soo baxay, meel walbana kafan kaga xidhan tahay - NOOLYAHAY!



14



15



16

Ciise iyo Laasaros


Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Yooxanaa 11

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiya." Sabuurka 119:130

17



52



60

18

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysantahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad ugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

19